# Gundhiga Daraasada: Qorsheynta Qoyska ee Soomaalida degan Xaafada Eastleigh Dhexdeeda, Nairobi, Kenya

Daraasada waxaa soo sameysay
UNHCR, Guddiga Haweenka Qaxootiga, CDC iyo GIZ

Juunyo - Ogoosto 2011

*WARBIXINTII TABARUCAYAASHA BULSHADA*

## YAANU NAHAY?

Hay'ada laanta Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) ayaa u horseeday isuna dubariday tallaabooyinka caalamiga ah ee lagu badbaadinayo qaxootiga iyo xuquudooda caalamka oo idil.

Guddiga Haweenka Qaxootiga waa urur u dooda saldhigna ku leh New York, Mareykan (U.S.). Waxay u doodaa isbedel ku sameynta shuruucda, nidaamyada iyo barnaamkijyada lagu hormarinayo oo laguna badbaadinayo xuquuqda qaxootiga iyo haweenka gudaha ku barakacay, carruurta iyo dhalinyarada.

Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortaga Cudurka (CDC) waa hay'ad dowlada Mareykanka ay leedahay. CDC waxay leedahay Waax Caafimaadka Taranka oo ka hadasha caafimaadka taranka dadka qaxootiga iyo dadka gudaha ku barakacay ee ku sugan xaaladaha degdega ama ku qotoma xaaladaha degdega.

Deutsche Gesellschaft für Internationale Zusammenarbeit (GIZ) waa hay'ad gargaar oo gacan ka hesha dowlada Jarmalka dhinaca iskaashiga caalamiga iyo horumarka socon kara. GIZ waa howlwadaagta UNHCR ka hirgelisay dalka Kenya.

QORSHEYNTA QOYSKA IYO QAXOOTIGA

Qorsheynta qoyska waa karti shaqsiyadeed iyo mid lamaane ahaan ay ku rajeynayaan inay yeeshaan tirada carruurta ay doonayaan. Waxay kaloo karti ugu tahay inay kala doortaan kala dheereynta u dhexeysa carruurta iyadoo la isticmaalayo siyaalaha uurka looga hortagayo. Iyadoo la eegayo sharciga xuquuqda bini'aadanka ee caalamiga ah, inay helaan qorsheynta qoyska waa xuquuq bini'aadanka uu leeyahay. Shirkii lagu Suulinayey Dhammaan Nooc kasta oo Midabtakoor ah ee looga soo Horjeedo Haweenka (CEDAW) wuxuu leeyahay shaqsiyaadka oo dhan iyo lamaanayaasha waxay "xaq u leeyihiin inay go'aan ka gaaraan tirada, kala dheereynta iyo waqtiyeenta carruurta." Ficilka Barnaamijka wuxuu kasoo bilaabanayey sannadkii 1994 Shirkii Caalamiga ahaa ee Sii-badashada Dadweynaha wuxuu kaloo xusayaa xaqa ay lamaanaha iyo shaqsiga u leeyihiin/yahay "inuu si xor ah go'aan uga gaaro oo masuuliyad leh tirada, kala dheereynta iyo waqtiyeenta carruurtooda iyo inay haystaan macluumaad oo micnaheeda ah inay sidaa sameeyaan."



*Haweenka isu diyaarinaya dooda kooxaha ee ku saabsan qorsheynta qoyska ee bulshada, Luulyo 2011.*

## MAXAANU U NIMID EASTLEIGH?

Waxaanu Kenya u soo booqanay si aanu u baarno baaxada qaxootiga Soomaaliyeed ee isticmaala adeegyada qorsheynta qoyska ee xaafada Eastleigh, waana goobta tirada qaxootiga Soomaaliyeed ugu sarreysa ay ku sugan yihiin. Waxaynu doonaynay inaynu barano waxa dadka Soomaaliyeed ay u maleynayaan qorsheynta qoyska iyo haddii ay heli karaan ka hortaga uurka; sida ay dad badan u isticmaalaan; iyo adeegyada qorsheynta qoyska ay ka heli karaan xarumaha caafimaadka.

## MAXAANU QABANAY INTII AYNU KU JIRNAY BOOQASHADEENA?

Hal xubin oo ka socda Guddiga Haweenka Qaxootiga ayaa booqday Eastleigh ilaa lix Isbuuc intii lagu jiray bishii Juunyo iyo Luulyo 2011. Iyada iyo koox dhan 12 xubnaha bulshada ayaa waxay wareysteen 442 haween ee da'da taranka gaaray (15-49 sano jir). Waxay kaloo la kulmeen 41 rag, iyo haween iyo gabdho iyo wiilal qaangaadh ah oo wadahadal kooxeed lala yeeshay, waxay kaloo wareysteen hogaamiyayaasha bulshada si ay wax uga bartaan fikirkooda qorsheynta qoyska. Waxay kaloo booqdeen saddex xarumo caafimaad waxayna wareysi la yeesheen shaqaalaha caafimaadka ayagoo ka wareystay adeegyada ay bixiyaan.

Dhegeysigii dadka reer Eastleigh, waxaanu si toos ah wax uga baranay fikradohooda iyo waayo aragnimadooda. Waxaanu aad uga mahadcelinaynaa la kulankooda aynu la kulanay iyo ogolaanshahooda inay nala qeybsadaan macluumaadka iyo sheekooyinka hab masuulliyadeedka ah.

## MAXAANU KA BARANAY INTII AYNU KU JIRNAY BOOQASHADEENA?

Waxaanu ka baranay in 6.9% haweenka da'da taranka haatan ay isticmaalaan siyaalaha ka hortaga uurka. Inkastoo tiradan ay aad u hooseyso, wayna ka sareysaa dadka Soomaalida dhexdooda ee ku sugan xerada Qaxootiga ee Dadaab (sidoo kale waxay ku taalaa Kenya). Tani waxay soo jeedinaysaa in Soomaalida qaxootiga ee ku nool magaalada inay aad ugu furfuran yihiin isticmaalka siyaalaha qorsheynta qoyska amaba ay si aad ugu sahlan u heli karaan siyaalaha. Siyaalaha inta badan la isticmaalo waa midka kaniiniga afka laga qaato, kiniiniga waxay haweenka qaadaneysaa maalin kasta; duriinada haweenka waxay dhaqangeleysaa ilaa saddex bilood; iyo cinjirka raga, waa siyaalo ay raga isticmaalaan.

Waxaan kaloo wax ka baranay in diinta ay door muhiim ah ka cayaarto xubnaha bulshada ee garashada qorsheynta qoyska. Aaminaada bulshada dhexdeeda ayaa waxay tahay in haweenka dhalay carruurta tirada badan inay tahay go'aan iyadoo loo eegayo rabitaanka Rabaaniga, iyo in qoyska weyn ugu fiican yahay. Si kastaba ha'ahaatee, raga iyo haweenka waxay aaminsan yihiin in dhalmo kala dheereynta ay muhiim u tahay caafimaadka hooyada iyo caruurta. Waxay kaloo sheegeen in, sida ay qabto diinta Islaamka, naas-nuujinta iyo iska daadinta (Cazal) tahay siyaalo la aqbali karo ee ah kala dheereynta caruurta.

Waxaanu maqalnay in helida adeegyada qorsheynta qoyska ay fiican tahay iyo in xarumo badan oo caafimaad oo ku yaala Eastleigh ay bixiyaan siyaalo badan oo looga hortagayo uurka. Balse waxay xubnaha bulshada ka walacsanaayeen sir ahaanshaha marka ay booqanayeen xarumaha caafimaadka ee macluumaadka iyo adeegyada qorsheynta qoyska, waxay kaloo dareemeen in shaqaalaha caafimaadka had iyo jeer si fiican ula macaamilin. Waxaan kaloo baranay in xubnaha bulshada inaysan wax badan ka garaneen siyaalaha kala duwan ee kahortaga uurka.

## MAXAANU HADDA SAMEYNAYNAA?


Guddiga Haweenka Qaxootiga iyo UNHCR waxay qeybsan doonaan waxyaabahan soo baxay iyo talosoo jeedinta si wax looga bedelo adeegyada qorsheynta qoyska ee qaxootiga Soomaaliyeed. Qaar ka mid ah talo soo jeedinta ayaa waxay kala yihiin:

- Gaarsiinta bulshada inay diin, dhaqan iyo waxyaabaha shacabka keenaya ahaan uga hadlaan arimaha la xiriira qorsheynta qoyska. Culumada iyo raga waa in la gaarsiiyaa, maadaama ay door muhiim ah ka cayaarayaan go'aan ka gaarista.
- In la siiyo tababaro dhammaan shaqaalaha caafimaadka bulshada ee bixiya adeegyada qorsheynta qoyska, iyadoo fiirogaar ah la siinayo sii siyaadinta talo siinta oo aan laga reebeyn naas-nuujinta ilaa lix bilood iyo siyaalo uurka looga hortago mudo dheer, iyo la siyaadiyo aqoon u lahaanshaha ka hortaga uurka ee deg dega ah, oo uurka looga hortagi karo haddii la isticmaalo ilaa 120 saacadood kadib markii la sameeyo galmo aan ka hortag laheyn. Tababaradu waa in diirada lagu saaraa caawinta shaqaalaha caafimaadka inay fahmaan macluumaadka qaldan baqdinta laga qabo qorsheynta qoyska.
- In la fududeeyo isbedelada goobaha caafimaadka iyo xarumaha caafimaadka bulshada, sida in lagu siyaadiyo albaabo qolal talo siin ah si loo siyaadiyo sirta loona caawiyo macaamiisha una dareemaan inay la dhacsan yihiin. Qalab waxbarashana waa in la sameeyaa oo laga heli karo xarumaha caafimaadka oo luuqada Soomaaliga ku qoran.

## MAXAAD SAMEYN KARTAA HADAAD DOONAYSO INAAD WAX KA BARATO WAXYAABO BADAN OO KU SAAB-SAN SHAQADEENA?

Inaad wax badan ka barato qorsheynta qoyska ee Eastleigh, waxaad tagtaa Eastleigh City Council of Health Centre, oo ku taala 4th, Street 2nd Avenue. Waxaad kaloo booqan kartaa Marie Stopes Eastleigh Nursing Home, oo ku taala 1st, Avenue ee xaafada Section 1, ama Mother & Child Hospital oo ku yaala 1st, Avenue kasoo horjeedka Wilson Court, waxay dhinac ka saaran tahay Guryaha California. Wixii su'aalo kale ah, la xiriir Dr. Emmanuel Ojwang, Isuduwaha Caafimaadka UNHCR/BMZ Barnaamijka Iskaashiga ee GIZ + 254 0722206593.

Inaad wax badan ka barato Guddiga Haweenka Qaxootiga udoodista ayagoo u taagan haweenka, carruurta iyo dhalinyarada soo barakacay, booqo www.womensrefugeecommission.org ama nagala soo xiriir info@wrcommission.org.




Masawiro Guddiga Haweenka Oaxootiga/Erin McCoy.
Warbixinta waxaa qoray Erin McCoy.

Women's Refugee Commission | 122 East 42nd Street | New York, NY 10168-1289
212.551.3115 | info@wrcommission.org | womensrefugeecommission.org